Ku dhaqan Xafiis D.

# Faafinta Rasmiga ah
# الجريدة الرسمية
# Official Bulletin
## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 11aad** **Muqdisho, APRIL 2024** **Lr. 2**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BILAHA SOO BAXA

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

W.M

## BOGGA LABAAD

XEER

## BOGGA SEDDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

# BILAHA

# FEBRUARY-MARCH

# 2024

**Xeer Ra'iisal Wasaare Lr. 152** **Taariikh: 16/03/2024**

**XEER: QARAARKA DHAMMEYSTIRKA DHAQANGALINTA SHARCIGA SHAQADA WASAARADDA ARRIMAHA DIBADDA.**

1 8 MAR 2024

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 97aad faqradda 1aad iyo 2aad; Qodobka 99aad faqradaha (a), (b), (e), (f) iyo (g); iyo Qodobka 100aad faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG;

**Markuu arkay:** Sharciga Shaqada Wasaaradda Arrimaha Dibedda (**Sharci Lr.112/2013**) ee soo baxay 05/09/2013;

**Markuu arkay:** Warqadda Summaddeedu tahay MFA/FRS/SM/3817/2024 kuna saabsancodsi soo jeedinta Wasaaradda Arrimaha Dibedda & Iskaashiga Caalamiga ah ee ku aadan dhammeystirka dhaqangalinta Sharciga kor ku xusan;

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.10.67.03.24** ee **14/03/2024**, kuna saabsan **Qaraarka Dhammeystirka Dhaqangalinta Sharciga Shaqada Wasaaradda Arrimaha Dibadda** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu tixgaliyay:** Baahida loo qabo in Dalku ka faa'iideysto aqoonta iyo xirfadda diblomaasiyiinta Soomaaliyeed;

**Waxa uu Meelmariyay:**

**Qodobka 1aad**
**Jaangoynta Tirada Diblomaasiyiinta**

1. Tirada diblomaasiyiinta ka hawlgalaya safaaradaha, ergooyinka diblomaasiyadeed, iyo qunsuliyadaha guud waxa ay noqoneysa sida ku cad ***Shaxda 1aad*** ee ku lifaaqan Qaraarkan iyada oo la raacayo halbeegga soo socda:

    a) Safaaradaha ama ergooyinka ku asteysan "**A**" waxaa ka hawlgalaya seddex ilaa shan diblomaasi oo uu ku jiro danjiraha;

    b) Safaaradaha ama ergooyinka ku asteysan "**B**" waxaa ka hawlgalaya labo ilaa afar diblomaasi oo uu ku jiro danjiraha;

    c) Safaaradaha ama ergooyinka ku asteysan "**C**" waxaa ka hawlgalaya labo ilaa seddex diblomaasi oo uu ku jiro danjiraha.

2. Marka la dhimaayo tirada xubnaha hadda ka hawlgala safaaradaha, ergooyinka, iyo qunsuliyadaha guud waxaa la tixgalinayaa danta shaqada iyo muddada uu diblomaasigu uu shaqeynayay iyada oo xaaladda ciddii dhaaftay muddada uu Sharcigu jideeyay la waafajinayo Sharciga.

**Qodobka 2aad**
**Muddo-dhaafka Shaqada Dibedda**

1. Diblomaasi kasta oo ka shaqeynayay hal dal muddo ka badan afar sano, waa in xaaladdiisa la waafajiyaa Qodobka 39aad faqraddiisa (b) ee Sharciga Shaqada Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

2. Diblomaasi kasta oo ka shaqeynayay dibedda muddo ka badan siddeed sano oo xiriir ah waa in xaaladdiisa la waafajiyaa Qodobka 39aad faqraddiisa (c) ee Sharciga Shaqada Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

## Qodobka 3aad
## Dhimidda Tirada Safaaradaha

1. Muddo lix bilood gudaheeda ah, waxaa la xirayaa safaaradaha soo socda:

    a) Safaaradda Burundi
    b) Safaaradda Senegal;
    c) Safaaradda Canada.

2. Diblomaasiyiinta iyo shaqaalaha ka hawlgala safaaradaha la xirayo, waxaa la farayaa in ay gutaan waajibaadka kaga aadan Qaraarkan, Dalkana dib ugu soo noqdaan, waxaana xaaladdooda loo maareynayaa si waafaqsan Sharciga Shaqada Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

## Qodobka 4aad
## Hannaanka Fulinta Shaqada Dibedda

1. Wasaaradda Arrimaha Dibedda, waxaa la farayaa in ay u dhaqangaliso hannaanka jaranjarada kala sarreynta iyo wadashaqeynta xubnaha safaaradaha, qunsuliyadaha iyo ergooyinka diblomaasiyadeed si waafaqsan Sharciga Shaqada Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

2. Shaqada Arrimaha Dibedda waa in loo fuliyaa si waafaqsan xeerarka Dalka iyo kuwa caalamiga ah, iyada oo mudnaanta koowaad la siinayo danaha Qaranka iyo danaha muwaadiniinta Soomaaliyeed.

## Qodobka 5aad
## Xuquuqda iyo Xirfadaha

1. Dhammaan diblomaasiyiinta Soomaaliyeed iyo shaqaalaha shaqada arrimaha dibedda, waa in ay helaan xuquuqda uu sharcigu siinayo, waxaana la farayaa Wasaaradda Arrimaha Dibedda in ay dhaqangaliso ***Shaxda 2aad*** ee ku lifaaqan Qaraarkan, iyada oo la tashaneysa Wasaaradda Maaliyadda.

2. Dhammaan diblomaasiyiinta iyo shaqaalaha shaqada arrimaha dibedda, waxaa la farayaa in ay xirfadooda kor u qaadaan uguna adeegaan danaha Qaranka iyo muwaadiniinta Soomaaliyeed.

## Qodobka 6aad
## Dhaqangalka

Qaraarkan waxa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

### LIFAAQ: JAANGOYNTA TIRADA DIBLOMAASIYIINTA / ERGOOYINKA SAFAARADAHA SOOMAALIYA KA HOWLGALAYA

*Shaxda 1aad: Jaangoynta Tirada Diblomaasiyiinta Safaaradaha / Ergooyinka.*

| | Safaaradda /Ergada | Heerka | Tirada Diblomaasiyiinta |
|---|---|---|---|
| 1 | USA-Washington | A | 5 |
| 2 | UN-New York | A | 5 |
| 3 | Italy | A | 5 |
| 4 | Germany | A | 4 |
| 5 | France | A | 4 |
| 6 | Switzerland | A | 4 |
| 7 | Belgium | A | 4 |
| 8 | Russia | A | 4 |
| 9 | UK | A | 5 |
| 10 | China | A | 4 |
| 11 | Saudi Arabia | A | 5 |
| 12 | India | A | 5 |
| 13 | Itoobiya | A | 5 |
| 14 | Jabuuti | A | 5 |
| 15 | Masar | A | 5 |
| 16 | Kenya | A | 5 |
| 17 | Eriteriya | A | 3 |
| 18 | South Afrika | A | 5 |
| 19 | Turkey | A | 5 |
| 20 | Uganda | A | 4 |
| 21 | Sudan | B | 4 |
| 22 | Tansaniya | B | 4 |
| 23 | Qatar | B | 4 |
| 24 | Kuweyt | B | 4 |
| 25 | Oman | B | 4 |
| 26 | Dubai Consulate | B | 4 |
| 27 | UAE | B | 4 |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 28 | Bakistaan | B | 4 |
| 29 | Jeddah Consulate | B | 4 |
| 30 | Sweden | B | 4 |
| 31 | Zambia | B | 4 |
| 32 | Malaysia | B | 4 |
| 33 | Ciraaq | B | 4 |
| 34 | South Sudan | B | 4 |
| 35 | Yemen | B | 4 |
| 36 | OIC Mission | B | 3 |
| 37 | Nigeria | B | 3 |
| 38 | Canada | C | 3 |
| 39 | Serbia | C | 3 |
| 40 | Syria | C | 3 |
| 41 | Moroco | C | 3 |
| 42 | Algeria | C | 3 |
| 43 | Indonisia | C | 3 |
| 44 | Burundi | C | 3 |
| 45 | Libiya | C | 3 |
| | **Tirada Guud ee diblomaasiyiinta** | | **181** |

***Shaxda 2aad: Diblomaasiyiinta.***

| Tirada | Xilka | Tirada 5 | Tirada 4 | Tirada 3 |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Safiir/Qunsul Guud | 1 | 1 | 1 |
| 2. | Lataliyaha 1aad | 1 | 1 | |
| 3. | Lataliyaha 2aad | 1 | | |
| 4. | Xoghayaha 1aad | 1 | 1 | 1 |
| 5. | Xoghayaha 2aad | 1 | 1 | 1 |

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-27-2024
TAARIIKH: 01-04-2024
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo
Iskaashiga Caalamiga

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة الشؤون الخارجية
والتعاون الدولي

**Federal Republic of Somalia**
Ministry of Foreign Affairs and International Cooperation

MFA/FRS/SM/3817/2024

Tr: 13.03.2024

Ku: Golaha Wasiiradda JFS
Og: Xoghayaha Joogtada
Og: Wasiir ku xigeenka

Ujeeddo: Codsi Ansixin Sharciga Shaqada Arrimaha Dibadda

Golaha Wasiiradda ee sharafta leh waxa ay Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga halkan idinkugu soo gudbineysaa codsi ansixin Qaraar kaa oo ku saabsan dhammeystirka dhaqangelinta sharciga shaqada Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga,

Hadaba, mudaneyaasha sharafta leh ka waxaan rajeyneynaa in aad naga aqbali doontaan codsiga sare ku xusan.

Mahadsanidin

Xill. Cali Maxamed Cumar
Siihayaha Wasiirka ahna Wasiiru dowlaha

Afgoye Road-KM 5, P.O. BOX 105; Mogadishu, Somalia | http://www.mfa.gov.so
Email: sm@mfa.gov.so , osm@mfa.gov.so

Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL BULLETIN
# الجريدة الرسمية

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 2aad** **Muqdisho, 30 Maarso 2014** Lr. **7**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN SANADLE

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

**KOBNIIN**

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

BILAHA

SANADKA

**2014**

Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL BULLETIN
# الجريدة الرسمية

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 1aad Muqdisho, 31' July 2014 Lr. 3

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

## KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

Bilaha

## JUUN, JULY
## 2014

**XEER MADAXWAYNE Lr. 112** Taariikh: 05/09/2013

**Oggolaanshaha Sharciga Shaqada Wasaaradda Arrimaha Dibadda**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Xarafka 'C' iyo Qodobka 90aad, Xarafka 'F' Dastuurka J.F.S

MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoonka Golaha Shacabka Lr. 615-XG-08-13 ee 05/08/2013, kuna saabsan soo gudbinta Ansixinta Golaha Shacabka ee Sharciga Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga.

MARKUU TIXGELIYAY: In loo baahan yahay in wax laga beddelo Sharciga ay haatan ku shaqeyso Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga.

**Waxa uu soo saaray Xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo Xeerkaan, Waxaa la oggolaaday Sharciga dib u habaynta Shaqada ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga.

**Qodobka 2aad**

Waxaa Xeerkaan lagu baabi'iyay wixii sharci iyo xeer ah ee ka hor imaanaya Sharcigan.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu Xeerkaan Dhaqangelayaa maalinta uu Madaxweynaha Saxiixo Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliyeed

**MUQDISHO: 05/09/2013**

XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO. HA/1035/2014
TAARIIKH 2/08/2014
SAXIIXA NO.

Madaxweynaha J. F. S.
Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA

# Sharciga
# Arrimaha Dibedda

**Taariikhda la-Ansixiyay**
7da Luulyo 2013

# Tusmo


Qodobka 1aad: Samaynta iyo baabi'inta Ergooyinka diblomaasiyadda iyo Qunsuliyadaha ..... 1

Qodobka 2aad: Xuduudaha sharciga ..... 1

Qodobka 3aad: Kamid noqoshada shaqaalaha wasaaradda ..... 1

Qodobka 4aad: Shuruudaha diblomaasiga dibedda loo dirayo ..... 2

Qodobka 5aad: Howlaha saraakiisha diblomaasiyiinta ah ..... 2

Waajibaadka Danjiraha: ..... 2

Waajibaadka La-Taliyaha: ..... 3

Waajibaadka Xoghayaha Iaad: ..... 3

Waajibaadka Xoghayaha IIaad: ..... 4

Waajibaadka Ku Qeybsanaha Arrimaha Ganacsiga (Commercial Attache`): ..... 4

Waajibaadka Ku Qeybsanaha Arrimaha Dhaqanka (Cultural Attache`): ..... 4

Qodobka 6aad: Ergooyinka diblomaasiyadda ..... 4

Qodobka 7aad: Xilalka Ergooyinka diblomaasiyadda iyo Qunsuliyadaha ..... 4

Howlaha Qunsuliyaddu waxay ka koobantahay: ..... 5

Qodobka 8aad: Darajada ..... 6

Qodobka 9aad: Kala mudnaanta ..... 6

Qodobka 10aad: Maqaamku ku-qaybsaneyaasha arrimaha ciidamada ..... 7

Qodobka 11aad: Magacaabis safiir siyaasadeed (political apppointee) ..... 7

Qodobka 12aad: U magacaabid iyo ka-fariisin xil ..... 7

Qodobka 13aad: Darajooyinka iyo qaybinta xilalka ..... 7

Qodobka 15aad: Siihayaha magacaaban iyo kan waqtiga cayiman ..... 8

Qodobka 16 aad: Siihayaha Qunsuliyadda ..... 8

Qodobka 17aad:Gunnada Shaqada Dibedda ..... 8

Qodobka 18aad: Gunnada u dhaxeysa labo xil ..... 9

Qodobada 19aad: Fasaxa Sanadeedka ..... 9

Qodobka 20aad: Ticketka fasax –sanadeedka ..... 9

Qodobka 21aad: Gunnada muddada xil-gudashada dibedda ..... 10

Qodobka 22aad: Gunnada Huga Haybad-dhowrka (labiska) ..... 10

Qodobka 23aad: Gunnada martigelinta ..... 11

Qodobka 24aad: Gunnada danjiraha ma-daganaha ah (none-reident Ambassador) ..... 11

Qodobka 25aad: Gunnada xamuulka dheeriga ah ..... 12

Qodobka 26aad: Canshuur dhaaf ..... 12
Qodobka 27aad: Gunnada Waxbarshada caruurta ..... 12
Qodobka 28aad: Xirfadda iyo aqoonta luuqadaha ajnabiga ..... 13
Barashada luuqadaha qasabka ah: ..... 13
Gunnada luqaddaha dheeriga ah (optional) ..... 13
Luuqadaha ajnabiga ee khiyaariga ah (*optional*) ..... 13
Qodobka 29aad: Daryeelka caafimaadka ..... 14
Qodobka 30aad: Kharajyada geerida ..... 14
Qodobka 31aad: Dayuurad raacidda Madaxda Ergada ..... 14
Qodobka 32aad: Hoyga ..... 15
Qodobka 33aad: Diyaarinta Madaxda loo magacaabay Ergo/Qunsuliyad Guud ..... 15
Qodobka 34aad: Taariikh nololeedka shakhsiga (CV) ..... 16
Qodobka 35aad: Natiijada Warbixinta Xun ..... 16
Qodobka 36aad: Hawlgabnimo ku timaada karti-xumo ..... 16
Qodobka 37aad: Qaabka dallacsiinta ..... 16
Qodobka 38aad: U soo beddelid Danjire Xarun Dhexe ..... 17
Qodobka 39aad: Muddada shaqada dibedda ..... 17
Qodobka 40aad: War-gelinta beddelaadda ka hor ..... 17
Qodobka 41aad: Shaqaalaha maxaliga ah ee ka hawl gala Ergooyinka dibedda ..... 17
Qodobka 42aad: Waxyaabaha reeban ..... 17
Qodobka 43aad: Dhaqanka qofka ..... 18
Qodobka 44aad: Mamnuucidda u shaqeyn hey'ado ajnebi ..... 19
Qodobka 45aad: Qoraallada Sirta ..... 19
Qodobka 46aad: Awoodda nidaam dejinta ..... 19
Qodobka 47aad: Dhaqangalka Sharciga ..... 19
Qodobka 48aad: Baabi'in ..... 19

## Qodobka 1aad: Samaynta iyo baabi'inta Ergooyinka diblomaasiyadda iyo Qunsuliyadaha

A. Ergooyinka diblomaasiyadda iyo Qunsuliyadaha waxaa lagu samayn karaa ama lagu baabi'in karaa Go'aanka Golaha Wasiirrada oo cuskanaya soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda Iyo Iskaashiga Caalamiga ah; iyadoo isla markaana sababaha keenay sameynta iyo baabi'inta lala socodsiinayo Guddiga Arrimaha Dibedda ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliyeed, isla markaana lagu soo saaro Dekareeto Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka ah.

B. Magacaabista Madaxa Ergooyinka, Qunsuliyadaha iyo Hawlwadeennada Diblomaasiyiinta ah; waa in la waafajiyaa isku-dheelitirka Habka Awood Qeybsiga Dalka.

## Qodobka 2aad: Xuduudaha sharciga

Xudduudaha Sharci ee Ergooyinka diblomaasiyadda iyo Fadhiyada Qunsuliyadaha waxaa lagu sameynayaa Go'aanka Golaha Wasiirada oo cuskanaya soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah, laguna soo saaro dekreeto Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka.

## Qodobka 3aad: Kamid noqoshada shaqaalaha wasaaradda

Muwaadinka Soomaaliyeed ee doonaya inuu ka shaqeeyo Wasaaradda Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah waa inuu soo buuxiyo shuruudahan:

a. Inuu yahay Soomaali; yaqaanana Af-Soomaaliga (Maay & Maxaa Tiri) hadal & qoraalba
b. Inuu ka diiwaan gashanyahay Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Dowlada Rayidka ah,
c. Haddii uusan kamid ahayn in la diiwaangeliyo
d. In la hubsado isagoo lamarinayo Hay'adaha Qaranka ee kushaqada leh in aanu dambi gelin,
e. Hadii aanu ahayn Xirfadle ama Shaqaalaha hoose, waa in aqoontiisu tahay ugu yaraan heer jaamacadeed, islamarkaana uu qoraal iyo kuhadalba si fiican u yaqaan ugu yaraan mid ka mid ah afafka Carabiga, Ingiriiska iyo Faransiiska,
f. In uu dhimirkiisu fiyowyahay, jir ahaan iyo iyo lixaad ahaanba gudan karo howlaha diblomaasiyadda,
g. In uu bulshada ku dhex leeyahay sumcad fiican,
h. In uu ku guuleysto Imtixaanka Qiimaynta Wasaaradda, iyo
i. In uusan leheyn wax balwo ah ee wax u dhimi karta sharaftiisa iyo gudashada waajibaadkiisa Qaran.

## Qodobka 4aad: Shuruudaha diblomaasiga dibedda loo dirayo

Diblomaasiga dibedda loo beddelayo waa inuu buuxiyo shuruudahan:

1. In uu buuxiyay shuruudaha kamid noqoshada shaqaalaha Wasaaradda ee kuxusan Qodbka 3aad,
2. In uu ugu yaraan laba sano ka shaqeeyay xarunta Wasaaradda,
3. In aqoontiisu tahay ugu yaraan heer jaamacadeed, ama khibrad dheer oo u dhiganta, islamarkaana akhlaaqiyaadkiisa, kartidiisa iyo Soomaalinnimadiisa lagu kalsoonyahay,
4. Danjirayaasha Magacaabid Siyaasadeed (Political Appointees) ku yimaada waa inay ugu yaraan Laba bilood xarunta ka howl galaan, si ay u bartaan shaqada Wasaaradda iyo waaxyaheeda, xilka iyo waajibaadka laga rabo, iyo inuu helo macluumaadka siyaasadeed, dhaqan iyo dhaqaale ee dalka loo magacaabay;
5. Shakhsiga xilka faqradda 4aad ku xusan loo magacaabayo, waa in uu xilal sare oo dawldeed hore u soo qabatay, waana in uu buuxiyo qodobka 3aad xarafaha "a, e, f, iyo h" ee Sharciga
6. Safiirka iyo diblomaasiyiinta kaleba waa in ayna hal dal joogin wax ka badan afar sannadoood, iyo
7. In uu qaato tababar gaar ah (Tababarka shaqada diblomaasiyadda dibedda- *"Diplomatic Foreign Service Training"*) oo uu kuqaato gudaha ama dibedda.

## Qodobka 5aad: Howlaha saraakiisha diblomaasiyiinta ah

Madaxa Ergada oo ahaan kara Danjire, Siihaye ama Qunsul Guud waa in uu fuliyo hawlaha uu u xilsaaran yahay si waafaqsan shuruucda Dalka, waxaana uu si gaar ah mas'uul uga yahay Safaaradda, Ergada ama Qunsuliydda iyo kormeerka iyo isku xirka dhammaan hawlwadeennada

**Waajibaadka Danjiraha:**

1. Wuxuu wakiil uga yahay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waddanka uu joogo iyo kuwa uu ka wakiilka yahay oo aan fadhigiisa ahayn (Non-resident Ambassador), adkaynta iyo horumarinta xiriirka diblomaasiyadeed;
2. Wuxuuna madax u yahay dhammaan hawlwadeenada safaaradda ama Ergada, ha ahaadeen kuwa Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo ku-qeybsanayaasha Hey'adaha kale;
3. Ilaalinta danaha dalka iyo muwaadiniinta Soomaaliyeed, marba inta uu xaddidayo (oggolyahay) Sharciga Caalamiga Ahi;
4. La xaajoodka guud iyo dabagalka dhaqangelinta heshiisyada Dhexmara Jamhuuriyadda Soomaaliya iyo Dawladda uu la joogo iyo kuwa uu u xilsaaranyahay,
5. Kobcinta xiriirka saaxibtinnimo ee Jamhuuriyadda Soomaaliya iyo dowlada iyo/ama dalalka uu u xilsaaran yahay ee dhinacyada dhaqaalaha, dhaqanka, iyo xiriirka cilmiyeed, si waafaqsan Axdiga Vienna "1961" ee Xiriirka diblomaasiyadda.
6. U-kuurgelidda sida lagu horumarin karo wax wada qabsiga iyo wax is dhaafsiga Dowladaha; isaga oo wixii xog ah ee arrinta ku saabsan u soo gudbinaaya Dawladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

7. Wuxuu masuul ka yahay dhammaan hantida qaranka ee safaaradda ama Ergada,
8. Wuxuuu warbixin iyo talooyin(*Recommendations)* ka bixinayaa waxqabadka dhaqanka hawlwadeennada Safaaradda ama Ergada,
9. Wuxuu toosin iyo tillaabo anshax ka qaadayaa hawlwadeennada kukaca dhaqan xumo aan munaasib u ahayn sharaftooda.
10. Abuuridda iyo horumarinta jawi walaaltinimo iyo wada shaqayn ee hawlwadeennada dhexdooda; xallinta wixii khilaafaad ah ee ka dhex jira hawlwadeennada.
11. Wuxuu tababar khibradeed siinayaa, kuna dhiirigelinaya kor-u-qaadidda aqoonta iyo waxbarashada dibloomaasiinta iyo Hawlwadeennada Safaaradda Ama Ergada,
12. Wuxuu joogtaynayaa iskana xilsaarayaa mideynta, uruurinta iyo la kulanka jaalliyadda Soomaaliyeed eek u nool dalka uu joogo; isaga oo ku dhiiri gelinaya ilaalinta sharafta dalkooda, dadkooda iyo diintooda, ayna dhawraan shuruucda iyo xeerarka dalka martida loo yahay,
13. Hubinta tirakoobka iyo diiwaangelinta jaalliyadaha Soomaaliyeed ee ku nool dalka, ama dalalka uu wakiilka ka yahay, iyo
14. Ku baraarujinta Jaalliyadda Soomaaliyeed ee ku nool dalka uu wakiilka ka yahay in ay da'yartooda baraan afka, hiddaha iyo dhaqanka Soomaaliga.

**Waajibaadka La-Taliyaha:**

1. Waa kuxigeenka danjiraha xagga mas'uuliyadda Safaaradda ama Ergada, waxaana marka uu danjiruhu maqanyahayna uu qabanayaa dhammaan xilalkiisa, asagoo noqonaya siihaye (*Charge d' Affairs a.i);*
2. Wuxuu si gaar ah ugu xilsaaranyahay xuuraansiga arrimaha siyaasadda dalka uu joogo , abuuridda iyo horumarinta xiriirka labada dal,
3. Joogteynta warbixinnada cilaaqaadka siyaasadeed iyo iskaashiga u dhaxeeya Soomaaliya iyo dowladaha ay Safaaraddu wakiilka ka tahay (Non-resident Embassies), oo aysan xafiis uga furneyn Soomaaliya, iyo
4. Wuxuu kala taliyanaa danjiraha arrimaha xeerarka diblomaasiyadda, heshiisyada iyo sharciyada caalamiga ah.

**Waajibaadka Xoghayaha Iaad:**

1. Bixinta, cusboonaysiinta baasaboorada, dokumentiga dhoofintaanka, dhaafiyeyaalka, dal-ku-galka (visa) sharciyeynta dokumentiga iyo hawlaha madaniga ee dadka Soomaaliyeed, halkii aysan Qunsuliyadu ka furneyn,
2. Diiwaangelinta iyo tirakoobka jaalliyadda Soomaaliyeed ee ku nool dalka ay Safaaraddu ka furantahay iyo daryeelkooda;
3. Abaabulka barnaamijyada isdhaafsiga fanka, hiddaha iyo dhaqanka, isboortiga iyo cilmiga teknoolajiyada ee labda dal iyo
4. La socodka horumarka iyo waxbarashada ardada Soomaaliyeed iyo gacan siintooda.

**Waajibaadka Xoghayaha IIaad:**

1. Wuxuu qaabilsanyahay tirakoobka, diiwaangelinta iyo xannaanada dhammaan hantida Maguurtada iyo Guurtada ah ee Dowladda ee taal Xafiiska Safaaradda, Ergada, Qunsuliyadda, guriga Danjiraha, Qunsulka guud iyo aqallada xubnaha kale ee diblomaasiyiinta oo ay dowladdu bixiso kiradooda qalabkana ay leedahay
2. Maamulka xisaabaadka lacagta ee safaaradda ama Ergada, kharaj bixinta iyo xisaab celinta bil waiba, isagoo wixii lacag bixin ah la saaxiixaya Danjiraha ama ciddii markaas masuulka ka ah Safaaradda, Ergada ama Qunsuliyadda;
3. Kormeerka iyo lasocodka howsha shaqaalaha aan joogtada ahayn (local staff); isagoo si gaar ah isha ugu haynaya qorriinkooda, caymiskooda, fasaxyadooda, warbixintooda iyo marka ay shaqadu ka dhamaato siintooda, iyo
4. Ilaalinta, kaydinta iyo xannaanada dokumentiga, qalabka xafiiska iyo gaadiidka Safaaradda ama Ergada.

**Waajibaadka Ku Qeybsanaha Arrimaha Ganacsiga (Commercial Attache`):**

1. Wuxuu u xilsaaran yahay horumarinta iskaashiga dhaqaalaha iyo ganacsiga si waafaqsan Axdiga Vienna ee Xiriirka Qunsuliyadaha ee 1963;

**Waajibaadka Ku Qeybsanaha Arrimaha Dhaqanka (Cultural Attache`):**

1. Abaabulka barnaamijyada is-dhaafsiga waxbarashada, hiddaha, dhaqanka, fanka, isboortiga iyo cilmiga teknoolajiyada ee labada dal;

## Qodobka 6aad: Ergooyinka diblomaasiyadda

Ergooyinka dibloomaasiyaddu waxay ka koobanyihiin:

a) Safaarado
b) Ergooyinka joogtada ah ee Haey'adaha Caalamiga ah iyo kuwa Goboleed.
c) Ergooyin aan caadi ahayn

## Qodobka 7aad: Xilalka Ergooyinka diblomaasiyadda iyo Qunsuliyadaha

1. Xilalka Ergooyinka diblomaasiyadda waxaa ka mid ah:

a) Waxa ay dalalka ay joogaan wakiil uga yihiin Dawladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
b) Waxay dalalka ay joogaan uga wakiil yihiin danaha Jamhuuriyadda iyo tan muwaadiniinta Soomaaliyeed, inta uu xaddidayo (oggol yahay) sharciga caalamiga ahi;
c) Waxay wada xaajood la yeelanayaan Dawladda dalalka ay joogaan;
d) Waxay la xaajoonayaan isla markaasna xaqiijinayaan sida sharcigu qabo xaaladaha iyo horumarka waddamada ay joogaan, iyaga oo usoo gudbinaya warbixin Arrimahaa Dowladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyo

e) Waxay dhiirrigelinayaan xiriir saaxibtinnimmo ee dhexmara Dawladda Soomaliya iyo Dawladaha dalalka ay ka hawlgalayaan, si loo horemariyo xiriirka dhaqaale, dhaqan iyo saynis ee labada dal, si waafaqsan Axdiga Vienna ee 1961 kii ee xiriirka diblomaasiyadda.
f) Soo xereynta dhammaan dakhliga adeegyada ay qabtaan sida ugu dhaqsaha badan ama bishiiba mar.

**Howlaha Qunsuliyaddu waxay ka koobantahay:**

a) Ilaalinta danaha Dowladda Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya iyo dadkeedu ku leeyihiin dalka ay joogaan ha ahaato mid shaqsiyeed iyo mid hey'adeed , inta uu xaddidayo sharciga caalamiga ah;
b) Horumarinta ganacsiga, dhaqaalaha, dhaqanka iyo xiriirka cilmiyeed ee dhexmara Soomaaliya iyo dalka ay joogaan ama kobcinta xiriirada saaxiibtinimo ee labada dal, sida waafaqsan Axdiga Vienna 1963dii ee xiriirada Qunsuliyadaha;
c) U kuur-gelidda si sharciga waafaqsan xaalada horumarka, ganacsiga, dhaqaalaha iyo dhaqanka ee waddanka uu ka hawlgalayo, iyada oo xogta arrimahaas la xiriira loo soo gudbinayo Madaxa Ergada
d) Bixinta Baasaboorrada, documentiga safarka iyo cusbooneysiinta ay u baahan yihiin muwaadiniinta Soomaaliyeed iyo bixinta dal-ku-gayada (Visaha) ama dokumentiga la siiyo dadka doonaya in ay u socdaalaan Soomaaliya;
e) Gacansiinta muwaadiniinta iyo hey'adaha Soomaaliyeed;
f) Waxay u shaqaynaysaa sida hey'ad diiwaangelineed, waxayna qabataa howlo maamul iwm oo aan ka hor imaaneyn shuruucda iyo xeerarka u degsan dalka martida loo yahay;
g) Dhowrista danaha muwaadiniinta Soomaaliyeed, mid shaqsi iyo mid hey'adeed marka ay timaado Geeri iyo Dhaxal gudaha waddanka martida looyahay si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka dalkaasi;
h) Taakuleynta da'yarta iyo naafada Soomaaliyeed; gaar ahaan haddii shaqkhsiyaadkaasi ay damaanad daryeel u baahan yihiin, iyadoo la dhawrayo xuduudda uu oggol yahay sharciga iyo xeerarka dalka martida loo yahay iyo soo dhaweynta masuuliyiinta qaranka.
i) Metelidda ama suurtogelinta cid metesha dadka Soomaaliyeed ee laga doonayo maxkamad ama hey'ad kale oo ka tirsan waddanka martida loo yahay, iyada oo ladhowrayo shuruucda iyo xeerarka dalkaas, si loo badbaadiyo danaha muwaadiniinta Soomaaliyeed ee ay u suurtogeli-weydo in ay iyagu waqtigaas difaacdaan xuquuqdooda;
j) Soo gudbinta dokumentiga shuruucda iyo xeerarka gaarka ah (juridical and extra juridical), si la isu barbardhigo qawaaniinta maxkamadaha Soomaaliya iyo kuwa caalamiga ah, haddii aysan jirin heshiis caalami ah oo u dhigma sharuucda iyo xeerarka dalka martida loo yahay;
k) Xaq u lahaanshaha kormeerid iyo baritaan maraakiibta iyo dayuuradaha ka diiwaan gashan Soomaaliya iyo shaqaalahooda sida uu qabo sharciga Soomaaliya ee khuseeya arrimahaas;

l) Caawinaadda maraakiibta iyo dayuuradaha lagu xusay xarafka (K) ee qodobkan iyo shaqaalahooda, hubsashada qoraalka safarkooda iyo warqdaha maraakiibta, shaabadeynta waraaqaha markabka iyo baaritaan haddii ay is qabtaan saraakiisha iyo badmaaxyada sida uu qabo sharciga Soomaaliya, iyadoo la xurmaynayo sharuucda iyo xeerarka dalka martida loo yahay,
m) Soo dhaweynta Wufuudda Qaranka ee Rasmiga ah iyo Sagootintooda, iyo
n) Fulinta hawl kasta oo ay u wakiilato Dawladdu oo aan ka hor imanayn sharuucda iyo xeerarka dalka martida loo yahay ama waafaqsan Axdiga Vienna ee xiriirka Qunsuliyadaha ee 1963dii, Qodobkiisa 5aad.

## Qodobka 8aad: Darajada

1. Darajooyinka dibloomaasiyiinta waxay u qaybsan yihiin sida soo socoto:
   a) Madaxa Ergadu oo la kala ah
      i) Danjire
      ii) Sii-haye

   b) Lataliyeyaal
   c) Xoghayeyaal
   d) Ku-qaybsaneyaal

2. Darajooynka xafiiska Qunsuliyaddu waa sida soo socoto:
   a) Qunsul Guud
   b) Qusul
   c) Waxaa kale oo jiri kara Qunsu-sharafeed

Qunsul-sharafeedka waxaa magacaabistiisa soo jeediya Wasiirka Wasaarada Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah; waxaana oggolaada Wasiirka Koowaad; Kadibna Madaxweynaha Jamhuuriyada Federalka ayaa dekreeto ku magacaaba.

## Qodobka 9aad: Kala mudnaanta

Saraakiisha xarunta dhexe iyo Diblomaasiyiinta ka hawl-gala dibadda waxay leeyihiin heerarka kala sarreynta ee hoos ku tilmaaman:

1. Agaasimeyaal Guud;
2. Danjireyaal iyo Siihayayaal Magacaaban (*Charge* d' Affairs en titre);
3. Lataliyeyaal\Qusulada Guud
4. Agaasimeyaasha Waaxaha;
5. Xoghayeyaasha (1aad & 2aad)
6. Ku- qaybsaneyaal (ganacsiga, dhaqanka & warfaafinta)
7. Madax-qaybeed

8. Shaqaalaha farsamoyaqaannada ah, kal-kaaliyeyaal, iwm

### Qodobka 10aad: Maqaamku ku-qaybsaneyaasha arrimaha ciidamada

Habmaamuska awgeed, ku-qaybsaneyaasha arrimaha ciidamadu waxay istaagayaan maqaamka danjiraha ku xiga. Haseyeeshee waa u madaxbannaan yihiin gudashada hawlahooda u gaarka ah, laakiin waxaa waajib ah in ay la socodsiiyaan/wargeliyaan Madax Ergada. Ku-qaybsanaha ciidamadu ma qaban karo jagada ku-simaha Madax Ergada, marka uu maqan yahay Madaxa Ergedu.

### Qodobka 11aad: Magacaabis safiir siyaasadeed (political apppointee)

Madaxweynaha jamhuuriyaddu, haddii ay jirto baahi qaran, kaddib marka uu dhegeysto Wasiirka Arrimaha Dibedda wuxuu u magacaabi karaa danjire (ugu badnaan 10%); kaas oo ay lagama maarmaan tahay in uu buuxiyo shuruudaha ka mid noqoshada shaqaalaha Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo diblomaasiyiinta dibedda loo dirayo ee ku kala xusan qodobbada 3aad iyo 4aad ee sharciga.

### Qodobka 12aad: U magacaabid iyo ka-fariisin xil

A. Iyadoo aan loo eegin tilmaamaha sharciga shaqaalaha Dowladda ee ku saabsan u magacaabidda darajooyinka kale, Danjireyaasha iyo Qunsullada Guud waa in lagu magacaabo Dekreeto Madaxweynaha Jamhuuriyadda; taas oo ku imaneysa go'aanka Golaha Wasiiradda oo cuskanaya soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga Ah.

B. Lataliyeyaasha iyo xoghayeyaasha Ergooyinka safaaradaha iyo qunsuliyadaha guud waxaa magacaaba ama xilka ka qaada Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah.

### Qodobka 13aad: Darajooyinka iyo qaybinta xilalka

Shaqaalaha arrimaha dibeddu waxay ka kooban yihiin afar (4) qeybood:

| A | B | C | D/KH |
|---|---|---|---|
| Danjire,siihaye-<br>Magacaaban,<br>Lataliye,<br>Qunsul guud | Xoghayeyaal,<br>Ku qaybsane | Xirfadleyaal | Shaqale hose |

### Qodobka 14aad: Waajibaadka saraakiisha qunsuliyadda

Waajibaadka saraakiisha qunsuliyaddu waa sida soo socota:

a) Qunsulka Guud wuxuu ka mas'uul ka yahay kormeerka iyo isu-duwidda dhammaan qaybaha shaqo ee xafiiska Qunsuliyadda guud.
b) Qunsulku waa ku-xigeenka Qunsulka guud, wuxuuna u xilsaaran yahay qabanayaa shaqada qunsuliyadda guud.
c) Qunsul-ku-xigeenku wuxuu ka kaaliya Qunsulka Guud hawlaha Qunsuliyadda guud.
d) Marka uu maqan yahay Qunsulka Guud, Qunsulka ayaa noqonaya ku simaha Qunsukla guud.
e) Ku qaybsanayaasha maamulka waxay mas'uul ka yihiin shaqooyinka ay sida gaarka ah ugu cayinto Wasaaraddu/qunsulka Guud, sida maamulka, xisaabaadka iyo farsamada iwm.
f) Meeshii ayna ka furnayn Qunsuliyada Guud, haddii aysan Wasaaraddu soo magacaabin; hawsha Qunsuliyadda waxaa loo dhiibi karaa sargaal uu safiirku u xilsaaro oo ka tirsan ergada.

### Qodobka 15aad: Siihayaha magacaaban iyo kan waqtiga cayiman

1. Sii-hayaha magacaaban (*charge D'affaires en titre*), waxaa magacaaba Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga Ah; waxaana warqadda aqoonsiga siihayenimada ka guddooma Wasiirka Arrimaha Dibedda ee Dalka loo magacaabay. Siihayahan waxaa sida badan loo magacaabaa marka labada dal xiriirkoodu uusan wanaagsaneyn, hooseeyo ama bilow yahay. Waxa uu si dhan u qabanayaa shaqada Danjiraha.
2. Marka Danjiraha goobta shaqada ka maqan yahay, waxaa xilka sii haynaya lataliyaha siyaasadda oo noqonaya siihaya waqtiga cayiman (*Charge d' Affairs a.i*), hadii uu lataliyuhu maqanyahay waxaa xilka qabanaya sarkaalka ku xiga xagga darajada.

### Qodobka 16 aad: Siihayaha Qunsuliyadda

Marka uu Qunsulka Guud ka maqanyahay goobta shaqada, waxaa xilka Qunsulliyadda Guud qabanaya ku-xigeenkiisa.
Hadii ku-xigeenku maqanyahay, waxaa xilkaas qanabaya sarkaalka ku xiga xaga darajada.

### Qodobka 17aad:Gunnada Shaqada Dibedda

1. Sarkaalka shaqada Dibedda ee ka howlgala Ergo diblomaasiyadeed ama Qunsuliyad waa in lasiiyaa, gunno shaqada Dibadda, waxaa lagu qeexayaa sharci gaar ah; kadib marka la

helo go'aan Golaha Wasiirada oo cuskana soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah.

2. Gunnada lagu bixiyo farqada 1aad waxaa bixinteedu ka bilaabaneysaa maalinta sarkaalka si rasmi ah loogu magacaabay xilka shaqada dibadda.
3. Marka uu sarkaalka goobtiisa shaqada uga tago sababahaan: beddel, dib-ugu-yeerid, howlgab, gunnada shaqada dibadda waxaa la siin karaa:
    a) Danjire, siihayaha magacaaban iyo Qunsul Guud Seddex bilood;
    b) Diblomaasiyiinta kala duwan iyo shaqaalaha kale laba bilood.

## Qodobka 18aad: Gunnada u dhaxeysa labo xil

Sarkaalka ka shaqeeya Safaaradda, Ergo ama Qunsuliyad loona beddelo goob kale, waxaa si waafaqsan qodobka 17aad xarafka 'E' uu gunno laba bilood ah ku sii leeyahay goobtii hore ee laga badalay; waxaana uu goobta cusub gunno ku leeyahay wixii waqtigaas ka danbeeya.

## Qodobada 19aad: Fasaxa Sanadeedka

1. Diblomaasiga ka howlgala safaarad, Ergo ama qunsuliyad Guud waxaa lasiin karaa 15 maalmood oo fasax –sanadeedkiisa ka mid ah oo uu ku qaadan karo gudaha dalka uu ka shaqeeyo, 15ka maalmood ee uharayna waxaa loogu biirinayaa fasaxiisa danbe.

2. Marka uu dhameysto laba ilaa saddex sanood ee shaqada dibedda, Sarkaalka howlaha dibedda wuxuu xaq u yeelanayaa fasax uu ku qaato dalkiisa asagoo isticmaalaya fasaxyadii u aaruuray ee lagu soo xusay farqada 1aad.waxaana laga bixinayaa kirada guriga muddo hal bil ah.

## Qodobka 20aad: Ticketka fasax –sanadeedka

1. Diblomasiga dibedda ka howlgala, wuxuu labadii sanoba xaqu leeyahay hal ticket-fasaxeed buuxa(sii socod iyo soo socod) fasax ugu qaato dalkiisa.

2. Isticmaalka *ticketka* fasaxa dalku wuxuu noqonayaa sida soo socota:
    a) Diblomaasiyiinta iyo dhamaan xubnaha rasmiga ah ee qoyskiisa waxay usafri karaan dalkooda (Soomaaliya), dibna waxay ugu noqon dalkii ay ka yimaadeen ilaa iyo inta uu sarkaalkau ku sugan yahay isla goobtii shaqada dibedda;
    b) *Ticketyada* fasaxa dalka waxaa sarkaalka iyo xubnaha rasmiga ee qoyskiisa la siin karaa marka uu sarkaalaka dhameysto labo sano oo buuxda ee xilkiisa goobta dibedda.
    c) *Ticketka* fasaxa dalka oo aan la qaadan ka hor inta aan loo beddelin goob kale wuu ka lumayaa. Haseyeesha, haddii Sarkaalka ay Wasaaraddu ku amarto in uu ka tago goobtiisa shaqada dibedda, toosna u aado goobta kale isagoon qaadan *ticketka* fasaxa dalka; wuxuu xaqa fasaxa dalka yeelanayaa kaddib marka uu la wareego xilkiisa

shaqada ee goobta cusub; taas oo uu u caddeynayo Agaasimaha Guud, maadaama ay xaaladaasi ka duwan tahay habka caadiga ah oo looga oggolaanayo fasax sanadeedka.

3. Haddii diblomaasi ama xubin ka mid ah qoyskiisa uu beddesho qadka safarkiisa, xaq uma yeelanayo qiima ka duwan sicirka ticketka loo oggolaaday, xaqiisana wuxuu ku xadidanyhay qiimaha waddada ugu toosan ee loo oggolaaday in uu raaco.

4. Diblomaasi ama xubin qoyskiisa ee ku safraya ticketka fasaxa dalka, xaq uma yeelanayo in kharjka xamuulka dheeraadka ah ay dowladdu ka bixiso.

5. Xisaabta *ticketka* fasaxa dalka waxaa ku shaqo leh/lasiinayaa oo kaliya Ergada, Safaaradda ama Qunsuliyadda uu Sarkaalku ka howl galo.

6. (i) Ka sokow ticketka fasaxa dalka ee uu Sarkaalku leeyahay, waxa uu xaq u yeelanaya, muddada uu xilka hayo, laba ticket oo ah xaalad lama filaan ah (emergency) haddii diblomaasiga ama xubin qoysiiska ka mid ah uu doono in uu si degdeg ah ugu dhoofiyo Soomaaliya.
(ii) Haddii diblomaasiga ama afadiisa /seygeeda, la siiyo ticket xaalad degdeg ah, wuxuu/waxay wadan karaan caruurta oo dhan.

F.G: Qoys waxaa sharciyaan loola jeedaa:
(i) Xaaska /seyga, haddii ay si joogta ah u wada noolyihiin.
(ii) Caruurta haddii ay si joogta ah ula noolyihiin waalidka.

## Qodobka 21aad: Gunnada muddada xil-gudashada dibedda

Diblomaasiga shaqo awgeed ugu soo noqda dalka, wuxuu qaadanaya gunnadiisa shaqada dibedda oo buuxda ugu badnaan labo bil, Haddii sarkaalka la ruqseeyo ama xilka laga qaado isagoo howl dibedda u jira, xaq uma yeelanayo wax gunno ah.

## Qodobka 22aad: Gunnada Huga Haybad-dhowrka (labiska)

Gunnada Huga Haybad-dhowrka waxaa la siin karaa oo qura marka Sarkaalka diblomaasiga ah laga beddelo Xarunta ee uu ku jeedo Ergo, Safaaradda ama Qunsuliyadda loo beddelay.
Gunnada Huga Haybad-dhowrka waxaa lagu qeexayaa sharci gaar ah kaddib marka la helo go'aanka Golaha Wasiirada oo cuskanaya soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah.

Gunnada Huga Haybad-dhowrka waxaa looga danleeyahay in la daryeelo Sarkaalka hawsha loo dirayo, lagana gacansiiyo kharjka uga baxaya dharka iyo qalabka kale ee uu u baahdo marka dibedda loo beddelo.

## Qodobka 23aad: Gunnada martigelinta

1. Safaaradaha, Ergada iyo Qunsuliyadaha waa in loo qoondeeyo gunno martigelin sanadeed, taas oo ay Wasaaradda Arrimaha Dibeddu xaddideyso. Qoondadaas waxa ay Wasaaradda Arrimaha Dibedda kala xisaabtameysaa madaxa Ergada.
2. Kutala-galka gunnada martigelinta waa in lagu daraa miisaaniyad –sanadeedka Wasaaradda Arrimaha Dibedda. Xisaab celinta waxaa la raacayaa hab-raaca ay dejisay Wasaaradda Maaliyadda iyo Qorsheynta.

## Qodobka 24aad: Gunnada danjiraha ma-daganaha ah (none-reident Ambassador)

a) Haddii uu Madaxa Ergada isku mar ka wakiil yahay dal ama ka badan, Wasaaraddu waa in ay u qoondeyso kharajka martigelinta dheeri ah sanadkii.

b) Madaxa Ergadu wuxuu qaadan karaa gunno martigelin dheeri ah, waana in uu la yimaado caddeymo dhab ah muujinaya in uu galay kharjkaas.

c) Kharashka martigelinta dheeraadka ah, waa loo celinayaa marka lahelo shuruudahan.

d) In wadarta hormarinta aysan marna ka badnaan afarmeelood meel (1/4) ku talagal sanadeedka.

e) Hormarinta kasta oo uu qaato waa in uu soo caddeeyo inta aysan dhamaan xisaab xirka seddex-biloodlaha ah ee miisaaniyad –sanadeedka.

f) Madaxa Ergadu ma qaadan karo hormarin kale, mana codsan karo kharj-celin uu galay saddex bilood gudahood, isagoon marka hore xisaab celin ka keenin hormarintii uu horay u qaatay. Haraaga kharaka aan la isticmaalin dhamaadka sanadka miisaaniyadda waa ka dhacayaa.

g) Madaxa Ergada ee isla markaas wakiil ka ah dal ama dhowr dal, ka sokow dalka uu rasmi ahaan deggan yahay, wuxuu kaxaysan karaa afadiisa, marka uu u socdaalayo dhamaan dalalka uu wakiilka ka yahay, iyadoo la dhowrayo shuruudaha soo socda:

   (i) Booqashada afada Madaxa Ergadu ee dal waliba oo uu wakiil ka yahay waa in aysan ka badan laba mar sannad miisaaniyeedka gudahii.

   (ii) Wadarta maalmaha sannad miisaaniyeedka uu madaxa Ergadu u codsan karo afadiisa gunno maalmeedka, inta uu ku jiro socdaalkiisa dalka ama dalalka uu wakiilka ka yahay waa in aysan marna aan isku darka socdaalkiisa ka badnaan labaataan casho.

### Qodobka 25aad: Gunnada xamuulka dheeriga ah

a. Diblomaasiyiinta iyo howlwadeennada, waxay xaq u leeyihiin, in laga bixiyo kharajka xamuulka hantidooda gaarka ah, marka loo beddelo dibedda ama dib loogu soo celiyo xarunta ama safaarad kale, iyadoo la raacayo wadda-mareenka loo oggolaaday.
b. Diblomaasiinta iyo hoawlwadeennada kaleba waxay xamuulkooda ku qaadan karaan dayuurad (sida amarku yahay) ilaa 100 Kgs, *ticket* waliba iyo 50Kgs *ticketka* barka ah, in aan ka badneyn qoyskiiba 350kgs, taas oo ay ku jirto miisaanka xorta ah oo shirkadaha dayuuradaha bixiso. miisaanka ugu harsan, inta ay xaqa u leeyihiin waxaa loo marsiinayaa xagga dhulka ama badda , sida ku cad miisaanka mid waliba hortiisa ku qoran:

| Darajada sarkaalka | Haddii uu qoys la socda | Haddii uu kaligii yahay |
|---|---|---|
| Madaxa Ergo, Saf. ama Qunsuliyad | **2.500 k.,** | **2.000kg.** |
| Lataliye, Qunsul, Xogh.1aad | **2.000kg.** | **1.500kg.** |
| Xogh.2aad, Ku-qaybsane | **1.000kg.** | **500kg.** |

Qaadidda xamuulka dayuuradda waa in la isticmaalo kuwa shirkadda qaranka. meelaha aysan ka howkgelin shirkadda qaranku, xamuulka waxaa looo adeegsan karaa shirkadaha dayuuradaha ajnabiga, iyadoo lagu dhaqmayo sicirka xamuulka.

### Qodobka 26aad: Canshuur dhaaf

Haddii xubin ka tirsan diblomaasiyiinta dibedda laga soo beddelo oo loo soo beddelo Xarun dhexe, isagoo soo dhamaystay waajibaadkiisa, howlgabay ama geeriyooday, waxaa laga cafinayaa dhamaan wixii canshuur dowldeed ah ee ku waajibtay hantidiisa gaarka ah ee uu ku dhaqmayo sida qalabka guriga iyo halgaari oo uu horay u isticmaali jiray.

### Qodobka 27aad: Gunnada Waxbarshada caruurta

1. Gunnada waxbarashada caruurta waxaa laga bixinaya ilmaha da'doodu u dhexayso 5ilaa 18sano.Gunnada waxbarashada caruurta waxaa lagu bixiyaa, tan iyo inta laga garayo dhamaadka sannad-dugsiyeedka socda.
2. Tirada caruurta uu diblomaasiga ku qaadan karo gunnada waxabarashada waa caruurtiisa/caruurteeda oo dhan.
3. Gunnada waxaa lagu bixin kaaraa caruurta ku qaadata waxbarashada dugsi ka furan goobta shaqada diblomaasiga. Waana in la keeno caddeynmaha diiwaan gelinta iyo lacag bixinta.
4. Goobta laga heli karo waxbarasho lacag la'aan ah, una qalanta mustawaha safaaradaha laguma bixin karo gunno waxbarsho.

## Qodobka 28aad: Xirfadda iyo aqoonta luuqadaha ajnabiga

**Barashada luuqadaha qasabka ah:**

a) Xubin shaqada dibedda waxaa looga baahan yahay, inta uusan ku soo biirin shaqada dibedda, in uu imtixaan uga gudbo mid ka mida labada luqadood (Ingiriis ama Carabi)oo qasab ku ah aqoontooda.

b) Haddii uu sarkaalku horay ugu guuleystay imtixaankii qasabka luuqadaha , wuxuu awoodaa, oo uu kala dooran karaa, codsina u bandhigan karaa Wasaaradda, ruqsad uu kor ugu qaado heerka barashadiisa luuqadaha, ama uu codsado barashada luuqad kale oo dheeri ah(*optional)*, kana duwan tii asaga horay loogu qorsheeyay ee barashada qasabaka.

**Gunnada luqaddaha dheeriga ah (optional)**

c) Haddii xubin shaqadu uu ku guuleysto barashada luuqad ajnabi ee dheeri ah oo waafaqsan tilmaamaha farqadda kore, kadibna Sarkaalkaas loo beddelo dal ay luuqadaas dheeriga ah ay ka tahay luuqadda rasmiga ee dalkaas ama si balaaran loo gu dhaqmo, sarkaalkaasi wuxuu muteysanayaa, muddada uu shaqaada kujoogo dalkaas, in la siiyo gunno luuqadeed , oo u kala qiimeysan sada soo socota:

(i) Haddii uu sarkaalku ku gudbay imtixaanka luuqadda dheeriga ah, dhibco heer caadiya ah, waxaa la siinayaa U.S $200/, bishiiba.

(ii) Haddiise uu saarakaalku uga gudbo imtixaanka luuqadda dheeriga ah dhibco heer sare ah Wasaaradduna ay caddeyso in uu gaaray heerkaas sare oo ay aqoontiisa luuqaddu u oggolaan karto in uu ku noqon karo tarjume, waxaa la siinayaa U.S.$300/-bishiiba.

d) Sarkaal iskuma qaadan karo gunno luuqad, wax ka badan hal luuqad dheeri ah, marnaba.

e) Sarkaal aan ka gudbin barshada luuqadda qasabka aha ama aan la xaqiijin in shaqada looqaatay looma beddeli karo shaqada dibedda. Saraakiisha shaqada dibedda iyo xaasaskooda waxaa loo oggolaan karaa lacag celin ay dowladdu ku bixiso kharajka waxbarashada oo ku kooban ilaa 120 saacadood ama tababar kaltan ah(*part time)* aan ka badneen lix (6) bilood inta uu socda, si ay ku bartaan luuqadda dalka ay joogaan ama luuqadda aad looga hadlo dalkaas, ayadoo ku xiran oggolaanshaha Wasaaradda.wax tijaabo ah ama kharaj imtixaan ee loo celinayo ma jirayo. Laakiin waa in lagu soo lifaaqo caddeymo iyo marqaatifur (*certificate)* uu soo saxiixo Madaxa Ergadu.

Qidmadda la siinayo Sarkaalka arrinta quseyso, waxay noqoneysaa lacagta looga dhaqmo dalka uu joogo ama lacagta U.S.

**Luuqadaha ajnabiga ee khiyaariga ah (*optional)***

1. French
2. Amharic.
3. Kisawahili.
4. Italian.
5. Urdu.

6. Spanish.
7. Chinese.

## Qodobka 29aad: Daryeelka caafimaadka

Saraakiisha diblomaasiyiinta ah iyo hawlwadeennadu inta ay dibedda joogaan, waxay xaq u yeelanayaan daryeel caafimaad.

a. Daryeelkaas waxaa sidoo kale lahaan kara, kuwa soo socda:
   i) Xaaska/Seyga.
   ii) Carruurta aysan da'dooda ka badneen 18 sano;
   iii) Adeegyaasha dibedda loo watay oo ay Dowladdu kharajkooda bixiso, una adeega Madaxa Ergada.

b. Daryeelka ma quseynayo:
   i) Shaqaalaha Ergada dibedda ka qorato *(Local Staff)*;
   ii) Markii qofka xaqa u leh daaweynta uu joogo Soomaaliya;
   iii) Marka xubin ka mid ah qoyska ee xaqa u leh uu deggan yahay dal aan ahayn goobta Sarkaalku ka hayo shaqada dowladda.
c. Dhammaan saraakiisha shaqada dibedda, howlwadeennada iyo qoysaskooda (sida kor ku xusan) waa in kharashka daryeelka caafimaadkooda la caymiyo, iyadoo waafaqsan nidaamka u degsan dalka ay joogaan.
d. Dal waliba waxaa lala macaamilayaa Isbitaalada leh addeeggayada daruuriga ah ee caafimaadka.

## Qodobka 30aad: Kharajyada geerida

Haddii ay geeri ku timaado xubin hawlwadeennada dibedda ah ama xubin ka tirsan qoysaskiisa isagoo ku sugan goobta shaqada dibedda, dhammaan kharajka ku baxaya howlaha marxuumkaas iyo dib u soo dhoofinta meydkaas waxaa bixineysa Dowladda.

## Qodobka 31aad: Dayuurad raacidda Madaxda Ergada

1. Madaxa Ergada ee laga beddelay Xarunta Wasaaradda ee ku sii jeeda goobtiisa shaqo (si toos ah), wuxuu mudan yahay in uu ku safro *ticketka* darajada labaad *(Business Class)*.
2. Afada Madaxa Ergadu waxay ku safri kartaa ticket-ka darajada labaad marka ay/uu, wehliso asaga/iyada isla duulimaadna yihiin oo qura. Xubnaha kale ee qoyska waxay ku safrayaan *ticket* darajada caadiga ah *(Economic class)*.
3. Marka uu shaqo gaaban ka qabanyo Xarunta Dhexe ama dibedda, safarku wuxuu noqonayaa mid shaqo, sidaa darteed Madaxa Ergadu wuxuu ku dhoofi karaa *ticket* darajada labaad *(Business Class)*.

4. Afada Madaxda Ergadu waxay ku safri kartaa *ticketka* darajada koowaad, iyadoo ku wehliso seygeeda hawl gaaban, lana socda Madax Sare oo ah VIP.
Waxaa loo baahan yahay oggolaanshaha Wasiirka si ay afada Madaxa Ergadu ugu safarto *Ticketka* darajada koowaad, iyadoo ku wehlineyso seyigeeda gudashada hawl gaaban munaasibadda booqashada rasmiga ee Madaxa Dowladdu ama Xukuumaddu ku tegayaan dalka uu wakiilka ka yahay. Afadu waxay ku safreysa darajada koowaad marka ay la socoto seyigeeda, isla duulimaadkaas, ama ay la safreyso xaaska Madaxa Dawladda ama Xukuumadda, haddii kale waxay ku safreysaa darajada labaad *(Economic Class).*
Dhammaan saraakiisha kale waxay ku safrayaan darajada caadiga ah *(Economic Class).*
5. Iyadoo ku xiran awoodda dhaqaale, madaxa Ergadu wuxuu safar ku kala bixinayaa dalalka uu wakiilka ka yahay, marka uu safarkaasi dan qaran awgeed lagama maarmaan yahay. Madaxa Ergada eek u guda jira socdaal dalalka uu ka wakiilka yahay, iyadoo ay dowladdu bixineyso kharajka, wuxuu kaxeysan karaa Sarkaal Diblomaasi ah ama haddii loo baahdo wuxuu wadan karaa Xoghayntiisa gaarka ah, haddii uu dhulka ku safrayo waxaa dheeraadah oo uu kaxaysan karaa darawal.
6. Haddii aysan Wasaaraddu tilmaan gaar ah ka soo saarin, ugu badnaan tirada safarada uu sannadkii Madaxa Ergadu ku kala bixin karo dal kasta oo uu ka wakiil yahay, waa in aysan ka badnaan laba socdaal.

## Qodobka 32aad: Hoyga

1. Madaxa Ergada/Qunsulka Guud waxa xaq u leeyahay guri goglan oo munaasib u ah mid kiro ah ama mid ay Dowladdu leedahay, loona dayactiro labadii sano mar.
2. Madaxa Ergadu/Qunsulka Guud oo la siiyey deegaan ay Dowladdu leedahay ama ay Dowladdu ku bixiso kiro muddo dheer ah, inta uusan la wareegin deegaanaas, waa in uu si dhab ah isaga hubiyo dhismaha iyo qalabka guurtada ah ee yaal. Waa in uu alaabtaas ka hubiyo waxa ku qoran liiska diiwaanka Dowladda ee yaal Xafiiska Ergada/Saldhigga.
3. Madaxa Ergada/Qunsuliyadda Guud ma dhalanrogi karo deegaanka la dejiyay haddii uusan oggolaansho ka haysan Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

## Qodobka 33aad: Diyaarinta Madaxda loo magacaabay Ergo/Qunsuliyad Guud

1. Madaxda loo magacaabay Ergooyinka ama Qunsuliyadda Guud inta uusan qaban xilkooda cusub ee dibedda, waa in ay helaan warbixin la xariirta dalka saldhigoodu noqonayo/ midka ay wakiilka ka noqonayaan, waana in ay ka haystaan macluumaad guud dalkaas (dalalkaas) sida: taariikhda dalka, qaab-dhismeedkiisa siyaasadeed, dhaqanka iyo horumarkooda dhaqan dhaqaale. Waa in ay sidoo kale fikrad ka haystaan axdiyada caalamiga ah *(International Conventions)*; kan diblomaasiyadda iyo kan xiriirka qunsuliyadda.
2. Madaxa loo magacaabay Jagooyinka kor ku xusan, waa in si buuxda loo baraa xiriirrada labada dhinac u dhexeeya: Soomaaliya iyo dalka saldhigoodu noqonayo ama ay ka wakiil

noqon doonaan; iyada oo Wasaaradda Arrimaha Dibedda ay xog buuxda ee ku saabsan heerka xiriirka labada dal uu marayo ay siinayso, dhinaca kalana ay u caddeyneyso danaha gaarka ah ay Dowladdu wadankaas ka leedahay.

3. Haddii Madax loo magacaabay Ergo/Jago uu la yimaado diyaargarow la'aan iyo aqoon xumo howshiisa, Wasaaradda waxaa khasab ku ah in socdaalkiisa dib u dhigto inta uu ka soo bandhigayo wax taa ka duwan.
4. Qiimeyntaas waa in uu sameeyo guddi uu magacaabay Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah.
5. Dhammaan Saraakiisha diblomaasiyiinta kale, waa in ay maraan tabaabushaha kuwaa la mid ah, inta aysan u kicitimin halwaha loo xilsaaray ee dibedda, iyadoo ay kormeera-yaan: Agaasimaha Guud iyo Agaasimaha Waaxda ay quseyso ee Wasaaradda.

## Qodobka 34aad: Taariikh nololeedka shakhsiga (CV)

Iyadoo loola jeedo in lagu meel mariyo dhanka dallacsiinta u magacaabidda xil dibedda, Wasaaradda Arrimaha Dibeddu waa in ay u lahaato gal, dhammaan hawlwadeennada shaqada dibedda oo ay ku keydsan yihiin:

a. Taariikh nololeedka shakhsiga (CV)
b. Warbixin qarsoodi ah oo ku saabsan dhaqankiisa iyo waxqabadkiisa.

## Qodobka 35aad: Natiijada Warbixinta Xun

Diblomaasi amase hawlwadeen kasta oo ay ka timaadowarbixin xumi, waxay dhaxalsiin kartaa in la marsiiyo ciqaab sida waafaqsan sharciga shaqaalaha rayidka Dowladda.

## Qodobka 36aad: Hawlgabnimo ku timaada karti-xumo

a) Diblomaasi amase hawlwadeen kasta oo ka tirsan Wasaaradda oo loo arko in waxtarkiisu liito muddo labo sano oo xiriir ah, waxaa laga soo beddelayaa howsha uu hayo, laguna wareejinayaa meesha uu ka shaqeyn karo.
b) Diblomaasiga uu dal shisheeye soo eryo *(Persona non grata)* arrimo la xiriira akhlaaq-xumi iyo falal kale oo lid ku ah sharafta iyo sumacadda diblomaasiga awgeed (xiriirna aan la lahayn dan Qaran), kaddibna ay u caddaato Wasaaradda Arrimaha Dibedda in uu galay dembiga lagu soo eedeeyay, waa in Wasaaraddu tallaabo Sharciga waafaqsan ka qaadaa.

## Qodobka 37aad: Qaabka dallacsiinta

a) Dallacsiinta diblomaasiyiinta iyo haw-wadeennada Wasaaradda waa inuu waafaqsan yahay Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda.

b) Jagada Danjire *(Career Dilomat)* waa A-3. Hase yeeshee, waxaa loo dallacsiin karaa A-2 iyadoo lagu salaynayo mudnaanta (***merit***) iyo waayo-aragnimo (**Seniority**).

## Qodobka 38aad: U soo beddelid Danjire Xarun Dhexe

Danjiraha soo dhameystay waajibaadkiisa dibedda, wuxuu ka qaban karaa Wasaaradda jago u dhiganta darajadiisa sida: Xoghayaha Joogtada, Agaasimaha Guud ama xilkii kale ee uu wasiirka Wasaaraddu u magacaabo; waxaana uu lahaanayaa tilmaantiisa Danjirenimo xagga habmaamuuska.

## Qodobka 39aad: Muddada shaqada dibedda

a) Diblomaasiga ka shaqeeya Ergo Diblomaasiyadeed ama Qunsuliyad Guud, lagama beddeli karo goobta shaqada, isagoon la shaqeyn ugu yaraan laba sanadood, laga billaabo maalinta uu shaqada la wareegay, haddii aan dan guud darteed si kale loogu baahan.
b) Diblomaasigu kuma negaan karo goobtiisa shaqada Dibedda wax ka badan afar sano.
c) Diblomaasigu kuma maqnaan karo dibedda wax ka badan sided sanadood oo xiriir ah.
d) Kaddib markuu soo dhameysto shaqada dibedda waa in uu Xarunta ka haw-galo ugu yaraan laba sanadood.

## Qodobka 40aad: War-gelinta beddelaadda ka hor

Sarkaalka diblomaasiga ah iyo kan Qunsuliyadda ee la doonayo in laga beddelo Safaarad/Ergo ama Qunsuliyad, loona beddelo mid kale amaba Xarunta Dhexe, waa in la siiyo laba bilood oo uu isku diyaariyo.

## Qodobka 41aad: Shaqaalaha maxaliga ah ee ka hawl gala Ergooyinka dibedda

1. Shaqaalaha maxaliga *(Local staff)* oo ay qaataan Ergooyinka, Safaaradaha iyo Qunsuliyadaha waxaa lala gelayaa heshiss gaar ah (contract) oo waafaqsan shuruucda iyo xeerarka shaqaalaha dalka martida loo yahay.
2. Shaqaalaha Soomaaliyeed ee gudaha dalka laga diro *(Non Dilomatic Staff)* ee Safaaradaha/Qunsuliyadaha laga haw-geliyo, waxaa lagu maamulayaa Sharciga Shaqaalaha Soomaaliyeed.

## Qodobka 42aad: Waxyaabaha reeban

a) Sarkaalka diblomaasiga ah ama Qunsuliyadda iyo xubnaha kale waa in aysan:

i. ku kicin fal ku keeni kara tuhun, sharaftiisa, daacadnimadiisa ama u hoggaansanaanta la'aan dowladda.

ii. faafin ama uusan sababin faafinta qoraalo la xiriira hawlaha dowladda ama qaban warsaxaafadeed, haddii aysan ku imaan oggolaansho Madaxa Ergada ama Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda marka uu Sarkaalkaasi joogo Xarunta Dhexe.

iii. faafin warbixin sir ah ee uu ku helay maqaanka xilkiisa rasmiga ah, una gudbin cid aysan khuseyn, marka laga reebo hawlwadeennada shaqada ku leh oo ay u bannaan tahay in warbixinta caynkaas ahi ay gaarto. Mamnuuciddaasi waxay soconeysaa xataa marka diblomaasiga uu noqdo howlgab ama u ka tago xubinnimada shaqada diblomaasiyadda ama qunsuliyadda.

iv. Guddoomin ama uusan labisan billado *(Medals)* iyo astan *(decorations)* ajnebi, haddii aysan Wasaaradda horay ugu ruqseyn.

v. Guddoomin haddiyad qiimo sare leh ama maamus *"Testimonial"*, haddii uusan horay ugu oggolaan Madaxa Ergadu iyo Wasaaraddu, marka ay arrintu Madaxa Ergada khuseyso.

vi. Ka qeybgelin dhaqdhaqaaq siyaasadeed gudaha iyo dibedda dalka, haddii qeybgalkaasi ka horimaanayaan xilkiisa diblomaasi am qawaaniinta Dalka.

vii. Ka qeybqaadan shirkado iyo arrimo ganacsi marka laga reebo gudashada xilkiisa.

viii. Aqbalin xi lama hawlo ka hor imaanaya xilkiisa rasmiga ah.

ix. Ka qeybqaadan kutiri-ku-teen iyo in uusan sameyn maalgelin waxyeelayn karta xilkiisa rasmiga ah.

x. Xubnaha Diblomaasiyiinta, Qunsuliyadaha iyo kuwa Xarunta Dhexe ee ka baxsada Xafiiskooda ama bixiya warbixin sir ah, waxaa lala tiigsanayaa sharciga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

a) Shaqaalaha Wasaaradda iyo diblomaasiyiintu waa in aysan u oggolaan qoysaskooda ama xigtadooda la nool in ay ku kacaan arrimaha kor ku xusan.

b) Haddii aan dembi culus la gelin, waxaa lagu qaadayaa Sharciga shaqaalaha qofkii ku xadgudba qodobkaan.

## Qodobka 43aad: Dhaqanka qofka

1. Arrimaha aan loo oggoleyn diblomaasiyiinta, saraakiisha qunsuliyadaha iyo shaqaalaha ee ku xusan qodobka kore, waxaa kale oo ka mamnuuc ah:

i) In uu caadeysto nolol-qaameysan (deysane), uuna meel uga dhaco xushmadda diblomaasinimada.

ii) In uusan isku dayin ku daneysi ama wax ku yeeli diblomaasiyiinta kale culeys dibeddeed iyo cadaadis siyaasadeed oo la saaro madaxda.

iii) in uusan u oggolaan xubnaha qoyskiisa ama qaraabadiisa in ay jebiyaan dhaqanka xilka uu hayo.

2. Qodobbada qeexaya dhaqanka xilka ee kor ku xusan, waxay sidoo kale qabanayaan shaqaalaha Wasaaraddaha kale ee dulsaarka ku ah Ergooyinka iyo Qunsuliyadaha iyo dhammaan shaqaalaha Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah.

## Qodobka 44aad: Mamnuucidda u shaqeyn hey'ado ajnebi

1. Xaasaska diblomaasiyiinta iyo saraakiisha Qunsuliyadaha waa in aysan, si kastaba, ka shaqeyn Safaarad ajnebi ama hay'ado kale oo dowlad ajnebi ah leedahay.
2. Iyadoo la eegayo baahida shaqada iyo haddii ay jiraan jagooyin bannaan, xaasaska diblomaasiyiinta iyo saraakiisha Qunsuliyadaha, waxaa laga hawlgelin karaa Ergooyinka iyo Qunsuliyadaha, laga reebo xaasaska/seyga Madaxda Ergada.

## Qodobka 45aad: Qoraallada Sirta

a) Dhammaan qoraalada sirta iyo nuquladooda looma bandhigi karo shaqsi aan loo amrin.
b) Qoraallada sirta ah waa in lagu asateeyo ereyga **(Sir ama Sir Culus) laguna soo gudbiyo Koleyga Diblomaasiga (Diplomatic Pouch).**

## Qodobka 46aad: Awoodda nidaam dejinta

Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ahi waxay dejin kartaa nidaamyo iyo habab lagu hergelinayo Sharcigan iyo fasiraadiisa; marka lala tashado Guddiga Arimaha Dibadda ee Barlamaanka.

## Qodobka 47aad: Dhaqangalka Sharciga

Sharcigani waxa uu dhaqangelayaa marka uu Baarlamaanka ansixiyo, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uu saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

## Qodobka 48aad: Baabi'in

Wax alla wixii ka hor imaanaya sharcigan ee horey loogu dhaqmaayay qaanuun ahaan waa la baabi'iyay.